



# Orientation to Ontario

## DADKA KASOO JEEDA FRANCOPHONE EE KU CUSUB ONTARIO

### BULSHADA FRANCOPHONE EE KU DHAQAN ONTARIO

Sharciga Adeegyada Luuqada Faransiiska ayaa damaanad qaadaaya xuquuqda qofka u leeyahay inuu afka Faransiiska ku helo adeegyada wasaaradaha iyo wakaaladaha Dawlada Ontario oo lagu baxsho 25 aag oo loo asteeyay.

Si aad xog dheeraad ah uga ogaato 25 aag ee loo asteeyay, booqo [ofa.gov.on.ca/fr](http://ofa.gov.on.ca/fr)

Si aad u hesho xog dheeraad ah, wac laynka xogta ee ServiceOntario **1 866 532 3161** (wicitaan bilaash ah) ama gudaha Toronto **(416) 31 518**.

Waxaad dooni kartaa inaad hesho deegaannada Ontario ee aad ka heli karo adeegyada kaladuwan ee ku baxa Faransiiska. Si aad u hesho xog dheeraad ah, fadlan booqo [etablissement.org](http://etablissement.org)

Haddii aad haysato saaxiibo ama qoys doonaaya inay u soo guuraan Ontario, waxaad ku casuumi kartaa inay booqdaan [immigrationfrancophone-ontario.ca](http://immigrationfrancophone-ontario.ca)



Halkan Adeegyada iyo deegaannada Francophone ee ay heli karaan sida xogta maxaliga ah ee la xariirta waxbarashada, ganacsiga, shaqada iyo daryeelka caafimaadka.

Sharcigaan ayaa damaanad qaadaaya in adeegyadaas lagu baxsho afka Faransiiska marka la joogo xafiisyada dawlada gobalka.

### ILAHA LA HELI KARO

#### Xogta Dib u Dejinta

Inta aad degayso Ontario, waxaa jira ilo badan oo muhiim ah oo aad booqan karto.

Si aad u hesho wakaaladai dib u dejinta oo kuu dhow, booqo [www.etablissement.org/findhelp](http://www.etablissement.org/findhelp)

Dawlada Ontario waxay xog muhiim ah u haysaa dadka Francophone ka ah ee ku cusub gobalka inay ku noolaadaan Ontario. Wixii xog dheeraad ah oo ku saabsan bulshada Franco-Ontaria iyo xog ku saabsan ku hadalka afka Faransiiska gudaha Ontario, booqo [stage.ontarioimmigration.ca](http://stage.ontarioimmigration.ca)

Si aad u degto Ontario waxaad u baahan doontaa xog ku saabsan goobaha kaladuwan sida guriga, shaqada, daryeelka caafimaadka, adeegyada sharciga, waxbarashada, dhaqanka, qaab nololeedka iyo waxyaabo kale oo badan. Si aad u hesho faahfaahin, booqo [etablissement.org](http://etablissement.org)

Si aad u hesho adeegyada bulshada ee aad u baahan karto si aad u hesho xog 24 saac ah maalintii, 7 maalmood asbuucii, booqo [211ontario.ca/fr](http://211ontario.ca/fr) ama **211**.

Dadka maqalka ka jiran, wac **1-888-340-1001**. Marka aad wacdo 211, waxaad la hadli doontaa qof halkii aad la hadli lahayd mashiin adeegyaduna waa bilaash waana qarsoodi. Adeegyada ayaa lagu heli karaa in ka badan 100 luuqadood.

### SHAQADA

Ontario ayaa leh dhaqaale xoog badan, oo isku dhafan waxaana ka jira shaqooyin iyo ganacsiyo kaladuwan. Si aad u

1-855-626-0002  
<https://orientationontario.ca>

BONJOUR

Funded by / Financé par



Immigration, Refugees and Citizenship Canada

Immigration, Réfugiés et Citoyenneté Canada

hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan fursadaha raadinta shaqadaada wac Emploi Ontario [1 800 387 5656](tel:18003875656) ama booqo [ontario.ca/fr/communities/employment](http://ontario.ca/fr/communities/employment)

### WAXBARASHADA

Gudaha Ontario waxaa jira afar nidaamyada dugsiyada ee dawladu maalgeliso: Afka faransiiska, nidaamyada dugsiyada dawlda iyo kuwa Kaatooliga; afka Ingiriiska, nidaamyada dugsiyada dadwaynaha iyo kuwa kaatooliga ah. Waxaa jira gudiyada dugsiya afka Faransiiska oo 12 ah, kuwaasoo matala 425 dugsiyada ku hadla luuqada Faransiiska. Si aad u hesho xog dheeraad ah, booqo [ontario.ca](http://ontario.ca)

### ADEEGYADA CAAFIMAADKA BULSHADA

Haddii aad raadinayso adeegyada ku baxa Faransiiska ee dhinacyada adeegyada caafimaadka iyo bulshada, booqo [cliquezsante.ca/fr](http://cliquezsante.ca/fr)

### HAWEENKA

Haddii aad tahay qof dumar ah oo Francophone ah aadna wajahayso rabshad ama u baahan tahay caawimaad, wac Fem'aide oo aad ka helayso [1-877-336-2433](tel:18773362433) ama haddii aad maqalka naafada ka tahay, [1-866-860-7082](tel:18668607082). Laynka caawimaada ee Francophone ayaa la heli karaa 24 saac maalintii, 7 maalmood asbuucii. Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan adeegaan, booqo [femaide.ca](http://femaide.ca)

Waxaad ka qaybgeli kartaa bulsho oonleen ah oo loogu talagalay dhalinta gobalka ku cusub adoo booqanaya [nouveaujeunes.ca](http://nouveaujeunes.ca)

Halkaan waxaad ka daawan kartaa muuqaallo ay abuureen dadka da'yarta ah oo ku saabsan safarkooda dib u dejinta, waxaad ku biiri kartaa kooxaha dooda waxaadna heli kartaa xog ku saabsan dugsiya, shaqada, guriyaynta iyo meelaha kale ee aad xiiseynayso.

Haddii aad jirto 20 sano kayar tahay, aadna u baahan tahay inaad qof kala hadasho dhibaatooyin aad qabi karto ama cilado aad wajahayso, waxaad wici kartaa [1 800 668 6868](tel:18006686868) 24 saac maalintii, 7 maalmood asbuucii. Adeegyadaan waa qarsoodi, bilaash, waxay xifdinayaan sirtaada waana kuwo xirfadeed. Si aad u hesho xog dheeraad ah booqo [jeunessejecoute.ca](http://jeunessejecoute.ca)

